WE POWER Seattle

Dulmarka Qorshaha Hiigsiga 2019–2024

WE POWER Adkaysiga

Maadaama aan nahay magaalada hogaanka uhaysa dhanka macluumaadka, Seattle kuma cusba inay isbadal samayso. Ayadoo tignoolojiyadu hormar siisamaynayso, City Light waa adeeg kale oo xudun u ah taariikhda magaalada. Qorshaha Hiigsiga 2019-2024 wuxuu kudhisanyahay raasumaal, talaabo hiigsi leh ayadoo si indheergaradnimo ah loo xalinaayo caqabadahaan loona abuuraayo xalal faa'iido uleh ururkeena lajaanqaadka iyo adkaysiga leh.

Marka laga reebo inaan u adeegayno mid kamid ah magaalooyinka ugu kobaca badan wadanka, iibabka City Light ma ahayn riyo waayo waxay guul kakeentay dadaalada xakamaynta isticmaalka tamarta koodad adag oo loosameeyay dhismayaasha ganacsiga e deegaanka. Qorshaha hiigsiga ee cusub wuxuu naqshadaynayaa in hoos udhaco siisocon doono sida hoos kamuuqata. Nasiib daro, hoos udhaca iibka korontadu mayaraynain qarashaadka kubaxa shaqada korontada.

Waxba iskama badalin City Light: Xaruntu waxay wali kudadaalaysaa in macaamiisheedu helaan heerka ugu sareeya ee adeega. Ayadoo laraacaayo barnaamijyada Qorshaha Hiigsiga 2019-2024, City Light waxay abuuraysaa qaab casri ah oo wajiyo badan kaasoo lagu waajahaayo caqabadaha soofoodsaarta shirkada.

Laga bilaabo kobac dhanka shirkada oo dhan lagu samaynaayo oo kooxdu kashaqaynayaan si loo abuuro xiriir wanaagsan oo nadhexmara macaamiisha illaa gaarista fursado kale oo lagu dhisaayo tamar nadiif ah, City Light waxay maalgalinaysaa si wayn urur leh dhinacyo badan oo waxgal ah. Ayadoo dalabaadka macmiilka ee waxsoosaarka iyo adeegyada cusub ay sii kordhayaan, ayay sidoo kale shirkadu dadaal joogto ah ugalinaysaa buuxinta dalbaadkaas. Iyo, sida caadiga ahba, dadaalada City Light ee kahortaga isbadalka cimilada iyo kobaca sinaanta bulshada ayaa ah tiirarka haga shirkada.

Siwadajir ah, mashruucyadaan ayaa kadhigaaya City Light lamaane lagu kalsoonaan karo, tayo leh oo khayri ah siina xoojinaysa shaqada gaarka ah ee ay uhayso mujtamaca yo deegaanka - shirkad mustaqbal ah, oo maanta kuu adeegaysa.



WE POWER Hormarka

Qorshaha Higsiga 2019–2024 waxaa kujira barnaamijyo taageero oo afar arimood diirada lagu saaraayo.

1 Adeegga Macaamiisha

Hormarinta adeega macaamiisha

Waxay bixisaa adeegga macamiisha oo heer sare ah markay wax kaqabanayso baahiyaha macmiilka iyo rajooyinkooda, City Light waxay abuuraysaa xarunta xiriirka macaamiisha 24/7 shaqaynaysa ayadoo lkordhinaayo helitaanka macaamiishu helayaan macluumaadka iyo caawimaada. Xaruntaan adeegga ee dhamaystiran waxay usahlaysaa macamiisha inay doortaan qaabka ay noolashaqaynaayaan, ayagoo helaaya adeeggyo buuxo oo dhinacyo badan leh.

2 Awooda bixinta qarashka iyo Qiimaha Adeegga

Sookabida Qarashaadka soogala shirkada

Waxa kor looqaadayaa hufnaanta biil qorista iyo joojinta khaladaadka kadhaca qarashaadka lasoo aruursho ayadoo hoos loodhigaayo iibabka tafaariiqda ah ee korontada, City Light waxay dib uhabaynaysaa qiimaha adeegga si loowaafajiyo qarashaadka adeegyada macaamiisha lasiinaayo.

Kobaca Shaqada Ganacsiga

Waxa ladajinayaa xeelado iyo kafaa'iidaysiga fursadaha lagu tashiilaayo laguna yaraynaayo qarashaadka si joogto ah, dhinacyada gudbinta adeegga loogudbiyo macaamiisha iyo qarashaadka shaqada gudaha kubaxa labadaba.

3 Tamar Nadiif ah iyo Ilaalinta Bii'ada

Ilaalinta Bii'ada

Waxay siiwadaa shirkadu inay hogaanka uhayso dhanka warshadaha ee ilaalinta bii'ada ay kushaqayso.

Waxay tamar nadiif ah, oo dib loo isticmaali karo siisaa Magaalada

Waxay siiwadaa inay bulshada uhorseedo tamar nadiif ah lagu shaqaysto. Shirkadu waxay lashaqaynaysaa macaamiisheeda iyo iskaashatada bulshada in kor looqaado waxsoosaarka tamarta ee dhismayaasha, qalabka iyo gaadiidka, ayadoo la ilaalinaayo lana balaarinaayo faa'iidooyinkeena dhanka helitaanka nidaam koronto oo raqiis ah, aana lahayn sunta wada wasaqaysa ee carbon-ka.

4 Siiwadista Hormarka laga sameeyo Hiigsigeena Dhanka Ganacsiga

Dhaqanka Amaanka kudhisan

City Ligt waxay siiwadaysaa inay kor uqaado barnaamijkeeda Goobta Shaqada ee Amaanka ah, kasoo hoos udhiay waxyeelada gaarta shaqaalaha 23 boqolkiiba lagasoo bilaabo markii lahirgaliyay.

Goob shaqo oo Amaan ah, Adkaysi leh

City Light waxay dajinaysaa xeerarka ugu wanaagsan si kor loogu qaado barnaamijka dhanka amaanka, udiyaar garoowga xaaladaha degdega ah/kasookabashada masiiboyinka ayna hormariso adkaysiga xarumaha iyo adeegyada ay bixiso.

Waashay soojiidataa, Tababartaa ayna Ilaashataa Shaqaalaheeda

Si looxaqiijiyo shaqaalaha xirfada iyo dadaalka leh ee mustaqbalka shaqaynaaya, City Light waxay siiwadaysaa dhaqangalinta xeelad casri ah oo ay kuqoranayso shaqaale xirfad leh ayadoo kuweedii hore siijoogayaan shaqada.

Dib Ushaqaalaysiinta Mashruucyada Tamarta Laga dhaliyo biyaha

Biyo xireenada korontada ee shirkadu waa lafdhabarka awoodeeda bixinta tamar koronto oo layskuhalayn karo raqiisna ah. Codsiyada cusboonaysiinta sharciyada mashaariicda kala ah Skagit, Newhalem iyo South Fork Tolt waxaa lagudbinayaa sanadka 2023, 2025 iyo 2027, si iskuxigta.

Kor uqaadista Shaqada shirkada iyo amaanka Kumbuyuutarada

City Light waxay siiwadaysaa casriyaynta nidaamka dhismeedka tignoolojiyada ay kushaqayso iyo qulquliyaasha tamarta ee ay kushaqayso si wax looga qabto halisaha dhanka internetka kayimaada iyo shaqooyinka qulquliyaasha tamarta iyo iibinta jumlada ah ee tamarta.

Xifdinta Rasumaalka Jiilalka Tamarta laga dhaliyo biyaha

City Light waxay kor uqwaadaysaa barnaamijyadeeda ayadoo diirada hiigsiga saaraysa dhinac badan oo ah maalgalinta jiilalka tamarta iyo ilaalintooda. Hormarinadaan waxaa kamid ah dhaqangalinta hormarinada dhanka amaanka biyo xireenada, kor uqaadista nidaamyada goynta korontada iyo qorshaynta mudada fog ee sugida shaqada qalabkeeda korontada biyaha kasoosaara.

Ayadoo shaqada barnaamijyadu ay muhiim yihiin, midkasta wuu kufashilmayaa hadafka loogu talagalay hadaan marka hore lagu baarin qaab is le'eg. Ayadoo tan laga fakaraayo, qorshe kasta waxaa loodajiyay si kutalagal ah si uu ulajaanqaado dadaalka City Light ee sinaanta bii'ada, isirka iyo cadalada bulshada intaba.

Seattle City Light

Webka: seattle.gov/light/stratplan

Email: SCL_StrategicPlan@seattle.gov